HADDA WAXAAD TAHAY MARKHAANTI

Macluumaadka markhaantiyaasha
Ka bixinta caddayn dacwad dembi

OFFICE of
PUBLIC PROSECUTIONS
VICTORIA

Qoraalkaani wuxuu kaa caawimi doona fahamka waxa qayb ka ahaan doona markaad ka bixiso caddayn dacwad dembiyeed iyo sida aad ugu diyaagaroobi karto maxkamada.

Markaad caddayn bixinayso, waxaad qaadanaydsaa door qiima leh nadmaamka cadaalamda ee la xiriirta dembi. Nadaamka maxkamadeed wuxuu ku tiirsan yahay markhaantiyda runsheega ah.

Adeega ciqaab marinta

Dembiyada aadka u culus ee Fiktooriya waxaa ciqaad maraiya Director of Public Prosecutions oo u gudbinaya Office of Public Prosecutions (OPP).

Kooxda OPP ee ciqaabmarinta waxay la shaqeeyaan Victoria Police si loo ciqaabo arrimaha dembiga.

Kooxda OPP ee ciqaabmarinta waxay ka kooban yihiin garyaqaano diyaariya kayska sharciga iyo ciqaabmariye su'aalla weydiiya markhaantiga maxkamada una soo qadima xaallada xaakimka iyo xeerbeegta.

Kaalmada markhaantiga

Waa caadi inaad dareento xasilooni la'aan wixii la xiriira bixinta markhaanti maxkamada. Adeega OPP ee Witness Assistance Service (Adeega Caawimada Markhaantiga) (WAS) ayaa ku siin kara macluumaad iyo kaalmo inta hawshu socoto. WAS lacag la'aan, waana adeega takhasus ah oo shaqaaleeya aqoonyahano taya leh oo khibrad u leh kaalmaynta markhaantiyada iyo dhibanayaasha dembiga.

Shaqaalaha WAS waxay awoodaan:

- waxa dhacaya ka dhacaya maxkamada intaan la bilaabin, inta ay socoto iyo marka qaado
- waxay kaa caawimayaan helista xaqaaga iyo waxaad mudan tahay
- waxay kuu gudbinayaan hay'adaha iyo adeegyada kaleeto.

Talo-siin

- Haddii aad qabto wax su'aalla oo ku saabsan arrin, ama aad u baahan tahay macluumaad siyaada ah, la xiriir garyaqaanka OPP, qofka booliiska la shaqeeya ama WAS.
- Qabanqaabi in qof kuu hayo ilmaha maadaama aanu jirin adeeg ilma hayn ah oo maxkamada ka jira.

La xaallida qofka lagu amray inuu markhaanti bixiyo

Haddii aad ka bixinayso markhaanti dacwad dembiyeed taas macneheedu waxa weeye waxaad siisay qoraal booliiska waxaana laguu soo diray qoraal ku amraya inaad markhaanti furto.

Markhaantiga noocaan ah macnihiisu waxa weeye waxaa waajib ah inaad tagto maxkamada kana jawaabto su'aallo (bixiso caddayn) la xiriira waxaad u sheegtay booliiska. Waa jiri karta ciqaab weyn in aadan aadin maxkamada marka laguu soo diro amarka markhaantiga.

Meelaha lagala xiriirayo booliiska qofka la shaqeeya, oo baaray dembiga, iyo garyaqaanka OPP oo aad la xiriiri doonto, waxay ahaanayaan amarka u yeerista (subpoena).

Maalinta maxkamada

U-yeerista waxaa laguugu sheegi doonaa taariikhda dacwada, taasi waxaa laga yaabaa in aanay noqon taariikhda lagaaga baahan yahay inaad caddaynta bixiso.

Qofka booliiska la shaqeeya ayaa kula soo xiriiri doona markaad u baahan tahay inaad maxkamada timaado.

Haddii aan lagula soo xiriirin, fadlan wac booliiska qofka la shaqeeya ama garyaqaanka OPP.

Waxaa loo baahan yahay qabanqaabo

Inta aadan maxkamada tegin waxaad u baahan doontaa inaad shaqada ama waxbarashada fasax ka qaadato. Waxaa laga yaabaa inaad maxkamada timaado hal maalin ka badan.

Waxaad u baahan doontaa inaad u sheegto qofka booliiska la shaqeeya ama garyaqaanka OPP haddii aad:

- u baahan tahay mutarjum
- aad qabto iin kugu adkaynaysa adiga inaad caddayn bixiso
- bedelida cinwaankaaga iyo telefoon nambarka.

Kharajka markhaantiga

Waxaad sheegan kartaa kharajaadkaaga qaar ka mid ah imaanshaha maxkamada. Witness Expense Claim Form (Foomka dacwada kharajka markhaantiga) ayaa laguula soo diri doonaa amarka ka markhaanti-furka kaas oo sharxaya cadadka la sheegan karo. Gaari dhigashada iyo kharajka daryeelka ilmaha lama sheegan karo.

Tegida maxkamada

Diyaarinta caddaynta

Maalinta aad maxkamada aado, u akhri caddayntaada si degan dhowr jeer. Taasi waxay dib kuu xasuusinaysaa wixii aad u sheegtay booliiska. Ma awoodi doonto in aad dib u eegto caddayntaada markaad markhaantiga bixinayso.

Ha kala hadlin cid kaleeto waxaad u sheegtay booliiska markhaantiyada kale, ama inta aadan aadin maxkamada ama maxkamada dibadeeda.

Haddii aadan doonayn in cinwaankaaga lagu xuso maxkamada, waxaa waajib ah inaad u sheegto garyaqaanka OPP ama booliiska qofka la shaqeeya intaan maxkamadu bilaaban.

Tegida maxkamada

Markaad maxkamada timaado (haddii qabanqaabadii hore aan loo sheegin dadka booliiska la shaqeeya):

- Ka gal halka amniga maxkamadu joogaan, haddii ay lagama maarmaan tahay
- Hubi liiska maxkamada maalmeed oo ku yaalla meesha wax lagu qoro ee ku taallla irida
- Raadi magaca qofka dacwadiisa ka qaadayo iyo nambarka qolka maxkamada
- Gal qolka maxkamada sugna qofka booliiska la shaqeeya ama garyaqaanka OPP si uu ula xiriiro.

Haddii aad joogto maxkamada gobolka, waxaad u tegi kartaa Diiwaanhayaha miiska jooga si uu kuu caawimo.

Talo-siin

- Haddii aad u gaari u qaadanayso maxkamada, xaqiiji inaad hesho goobta gaaridhigashada maalinta oo dhan ah.
- Laguuma ogola inaad fadhiisato qolka maxkamada oo aad dhegaysato markhaantiyada kale inta aadan bixin caddayntaada. Sii qaado waxaad akhrisato ama waqtiga ku disho intaad sugayso.
- Maxkamadu waxay badanaa fadhiisataa 10.00 subaxii to 4.15 galabtii qadadana waxaa loo baxaa 1.00 duhurkii ilaa 2.00 duhurkii.

Qolka-maxkamada gudaheeda

Dacwada dembiga waxaa lagu qabtaa xaakimka iyo xeerbeegta hortooda. Dhamaan markhaantiyada lugta ku leh dembi ku oogida, kuwaas oo ay ka mid yihiin dembiyada dhibanaha, waa inay bixiyaan caddayn iyaga oo ka jawaabaya su'aallaha.

Tegida qolka maxkamada

Marka la soo gaaro inaad bixiso caddaynta, magacaaga ayaa loo yeeri doona. Ka dib marka la galo sanduukha markhaantiga.

Sarkaalka maxkamada ayaa ku weydiin doona:

- Haddii aad ku dhaaranayso Baybalka ama Kitaabka, ama aad ballanqaadayso inaad arrinta (ta'kiidin) runta ka sheegayso.
- Magacaaga oo buuxa
- Inaad ku dhaarato ama diin ama ta'kiidin.

Dembi oogayaasha ayaa dabadeed ku weydiin doona:

- Magacaaga oo buuxa
- Shaqadaada.

Habka caddaynta

Dembi oogaha ayaa ku weydiin doona su'aallo marka hore. Kan waxaa loogu yeeraa 'evidence-in-chief' ('caddaynta ugu muhiimsan').

Garyaqaanka difaaca, oo matalaya qofka la soo dacweeyey, ayaa dabadeed ku weydiin doona su'aallo. Kuwaas waxaa loogu yeeraa 'cross-examination' ('gudub-u-su'aalled).

Dembi-oogayaasha ayaa laga yaabaa inay dabadeed ku weydiiyaan su'aalla intaas ka badan. Tan waxaa loogu yeeraa 're-examination' ('dib-u-su'aallid').

Xaakimka ayaa laga yaabaa inuu su'aalla ku weydiiyo.

Talo-siin

- Xaakimka waxaa loogu yeeraa 'Your Honour' ('Mudane').
- La xiriir WAS haddii aad jeclaan lahayd kaalmada shakhsiga kaas oo maxkamada kula jooga iyo markaad caddaynta bixinayso.

Bixinta caddaynta

Sheegista runta ayaa ah waxa ugu fiican oo la sameeyo markaad ka jawaabayso su'aallaha maxkamada gudaheeda.

Markaad bixinayso caddaynta:

- U dhegayso si degan su'aasha ka hor inta aadan ka jawaabin
- Qaado waqtigaaga si aad uga jawaabto su'aasha
- Haddii aadan maqal ama aadan fahmin su'aasha, weydii in laguugu celiyo
- Haddii aadan xasuusan ama aadan hubin, waa inaad sidaas tiraahdaa
- Haddii aad hubto, sidaas ayaad oran kartaa
- Markii aad dhamayso bixinta caddaynta, xaakimka ayaa ku fasaxaya xor ayaadna u tahay inaad iska tagto.

Talo-siin

- Waxaad weydiin kartaa xaakimka inaad qaadato fasax gaaban haddii aad u baahan tahay.
- Cod baahiyaha ayaa duubayaa jawaabta laakiin ka dhigi mayo codkaaga mid dheer, sidaas darteed waxaad u baahan tahay inaad si waadax ah u hadasho.

Faraxumayn iyo arrimaha rabshada qoyska

Haddii aad tahay dhibane faraxumayneed waxaad ku bixin kartaa caddayntaada meel ka durugsan maxkamada adiga oo ka hadlaya telefishanka khaaska ah. Haddii aad tahay dhibane rabshad qoys waxaa laga yaabaa in laguu ogolaado inaad isticmaasho telefishanka khaaska ah si aad u bixiso caddayntaada.

Waxaad kaloo caawima ka helli kartaa qofka kaalmadu inuu kula fadhiisto meel durugsan markaad bixinayso caddaynta. Qofka kaalmada waxaa waajiba inay ansixiso maxkamadu mana noqon karo markhaanti kale.

WAS ayaa ka jawaabi karta su'aallahaaga xagga isticmaalida tas-hiilaad durugsan si aad ugu bixiso caddayntaada.

Dhamaadka dacwada

Marka dhamaan markhaantigu bixiyo caddaynta, dacwad oogaha, garyaqaanka difaaca iyo xaakimka ayaa la hadli doona xeerbeegta wixii ku saabsan caddaynta sharciga.

Xeerbeegta ayaa dabadeed go'aansan doonta haddii qofka la soo dacweeyey yahay dembiile iyo haddii kale. Ma jiro waqti go'an oo xeerbeegtu ay tahay inay go'aan ku sameeyaan.

Haddii qofka la soo dacweeyey lagu hello dembi, dhibanaha ayaa diyaarin kara Victim Impact Statement, taas loo soo gudbin karo maxkamada waqtiga dhegaysiga.

Xaakimka ayaa go'aan ka gaari kara xakumida dhegaysi kale maalin kale.

Haddii la dacweeyaha lagu waayo dembi, si xor ah ayuu u tegi karaa.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad ogaato natiijada dacwada, wac qofka booliiska la shaqeeya, garyaqaanka OPP ama WAS.

Qodobada ugu muhiimsan

- Haddii lagugu keenay markhaantinimada u-yeeris waa inaad timaadaa maxkamada si aad caddayn u bixiso.
- Waa muhiim in la sheego runta marka la bixinayo caddaynta.
- Marna ha kala hadlin caddayntaada markhaanti kale.
- Haddii aad tahay dhibane la faraxumeeyey waxaad bixin kartaa caddaynta adiga oo aan joogin maxkamada oo isticmaalaya telefishan khaaska ah. Haddii aad tahay dhibane rabshad qoys waxaa iyana laga yaabaa in laguu ogolaado inaad isticmaasho telefishan khaasa.
- Kaalmo ayaa waxaa helli kara Witness Assistance Service.
- Waxaad weydiin kartaa qofka booliiska la shaqeeya ama garayaqaanka OPP wixii macluumaada oo ku saabsan arrinta aad lugta ku leedahay.
- Kooxda dembi oogayaasha u sheeg haddii aad bedesho cinwaankaaga ama faahfaahinta la xiriirida.

Macluumaad iyo caawimo

Office of Public Prosecutions
T: 03 9603 7666
E: info@opp.vic.gov.au
www.opp.vic.gov.au

Witness Assistance Service
Office of Public Prosecutions
565 Lonsdale Street Melbourne 3000
T: 03 9603 7425
T: 1800 641 927

Victims of Crime Helpline
T: 1800 819 817
8.00 subaxii – 11.00 habeenimo, 7da berri ee asbuuca
www.justice.vic.gov.au/victimsofcrime

Khadka Macluumaadka Vision Australia
T: 1300 847 466

Adeega TTY (Maqal La'aan)
T: 13 36 77

Adeega Afcelinta iyo Tarjumaada qoraalka (TIS)
T: 13 14 50

Maxkamadaha

Melbourne Magistrates' Court
233 William Street Melbourne 3000

County Court of Victoria
250 William Street Melbourne 3000

Supreme Court of Victoria
210 William Street Melbourne 3000

Warqada lagugu amrayo inaad u timaado markhaanti waxaa ku qoran cinwaanka maxkamada halkaad u baahan tahay inaad timaado.

Waxaa daabacay lehna xuquuqda daabicida Xafiiska Dacwa-oogista ee Dadweynaha (Victoria) Juun 2014

DTPL8403_06/14

State Government Victoria